dadow, waxaan sidaan u sameeyey inaad igu dayataan oo barataan salaadayda

Abii Xaasim Binu Diinaar Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rag ayaa u yimid Sahal Binu Sacad Alsaacidi Allaha ka raali ahaade iyagoo ku murmay geedka laga sameeyey mimbarka, taasyna waydiiyeen, wuxuu ku yiri: walaahi ma ogi waxa laga sameyey, waana joogay maalintii u horaysay ee la soo dhigay iyo maalintii u horaysay ee Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ku fariistay, Nabigu wuxuu fartiin u diray gabadha hebla ah, waana gabar Ansaar ah oo Sahal magacaabay, oo Nabigu scw ku yiri: " u dir wiilkaaga Najaarka ah ha iiga sameeyo tiirar wax aan ku fariisto markaan dadka la hadlaayo", wayna u dirtay wuxuuna ka soo sameeyey geedka la dhoho Darfa`i ee baadiyaha ka baxa, ka dibna wuu u keenay, wayna u sii dhiibtay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee , markaas ayaa Nabigu amray in la dhigo halkaan, ka dibna waxaan arkay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee oo fuushan oo takbiirsaday isagoo fuula, oo rukuucay isagoo fuula, ka dibna gadaalgadaal uga soo dagay, oo mimbarka salkiisa ku sujuuday oo hadana ku noqday, markuu dhamaystay ayuu dadka ku soo jeensday oo ku yiri: " dadow, waxaan sidaan u sameeyey inaad igu dayataan oo barataan salaadayda".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rag ayaa u yimid mid ka mida Asaxaabta, iyagoo waydiinaya minbarkii Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu samaystay waxa laga sameeyey? wayna ku murmeen oo ku doodeen arinkaa, wuxuuna u sheegay: in Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee qof u diray gabar Ansaar ah, taasoo wiil khaadim ah oo najaar ah lahayd, wuxuuna Suubbanuhu faray gabadhaa inay wiilka amarto inuu u soo sameeyo minbar uu ku fadhiisto markuu dadka la hadlaayo, wayna aqbashay gabadhii, wiilkiina waxay fartay inuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uga soo sameeyo geedka durafa`a, markuu dhameeyey gabadhii waxay u dirtay Nabiga scw, Nabiguna scw wuu amray in la dhigo meesha uu masjidka ka yaalo, ka dib Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu ku tukaday wuuna takbiirsaday isagoo fuula, wuuna rukuucay isagoo fuula, ka dibna waa ka soo dagay isagoo gadaal u socda oo aan wajigiisa xaga danbe u jeedinayn wuxuun ku sujuuday minbarka salkiisa ka dibna waa ku noqday, markii uu dhamaystay salaadii ayuu dadka ku soo jeensaday oo ku yiri: waxaan sidaan u sameeyey inaad igu dayataan oo barataan salaadayda.